# Ogeysiiska Magdhawga ee Minnesota

**1. Dakhliyada**

Dakhliyadaadu waxay ka kooban yihiin Khidmadda Darawalka iyo lacagaha dheeriga ah (haddii ay khuseeyaan), sida hoos lagu faahfaahiyay laguna sharaxay Lifaaqa Darawalka.

Khidmadda Darawalka

Waxaad kasbaneysaa Khidmadda Darawalka safar kasta oo aad dhammaystirto. Khidmadda Darawalka waxay ka koobnaan doontaa mid kamid ah:

1. Qaddarka khidmadda saldhiga ah ama khidmadda soo-qaadista, iyo qaddar kordhin ah oo ku salaysan wakhtiga dhabta ah iyo masaafada safarka ee ay cabbirtay Lyft. Khidmadda saldhigga ah ee khuseeyso iyo/ama qaddarka khidmadda qaadista iyo qiimaha halkii mayl iyo halkii daqiiqad waxay ku salaysan yihiin goobta safarka. Kaarka Sicirka/Qiimaha ee ka muuqda dhashboardkaaga Darawalka wuxuu tixi doonaa khidmadda saldhiga ah ama qaddarka soo-qaadista, iyo qiimaha halkii mayl iyo halkii daqiiqad..

2. Khidmadda Darawalka ee Hordhaca ah, taasi oo laguu soo sheegi doona kahor inta aadan aqbalin codsiga baabuurka. Khidmadda Darawalka ee Hordhaca ah ayaa la xisaabiyaa iyadoo la adeegsanayo dhowr waxyaabood, oo ay ku jiraan waqtiga iyo masaafada la qiyaasay, waqtiga iyo masaafada soo-qaadista, baahida loo qabo darawaliinta suuqaaga, iyo xaaladaha kale ee suuqa ee waqtigaa jira. Waxaa lagu siin doonaa Khidmadda Darawalka ee Hordhaca ah; si kastaba ha ahaatee, shirkadda Lyft ayaa go'aamin karta inay qaddarkan wax ka beddesho, haddii ay isbeddello la taaban karo ku yimaadaan safarka.

Lacagaha Dheeriga ah

Haddii ay khusayso, waxaad sidoo kale heli kartaa lacago dheeri ah, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn:

1. Lacagaha ay si ikhtiyaari ah (baqshiish) kuu siiyaan dadka aad qaado
2. Khidmadaha baajinta safarka
3. Wixii ah khidmad ama kharash dheeri ah oo aanu ku ururinno magacaaga, sida khidmadaha waddada, khidmadaha waxyeellada, iyo khidmadaha wakhtiga sugitaanka
4. Wixii ah gunno ama dhiirigelin oo aad kasbato oo ku salaysan bixintaada adeegyada baabuur-wadaagga

Lyft waxay ururisaa cashuurta iibka ee baabuur-raacyaasha ee khuseeya, khidmadaha dheeriga ah ee khuseeya, khidmadaha garoonka diyaaradaha, iyo khidmadaha, kharashyada dheeriga ah, ama cashuurta gobolka ama kuwa deegaanka ee Lyft looga baahan yahay ama uu sharci ama heshiis u oggol yahay inay ururiso oo ay ku wareejiso cid kale. Waxyaabahan lagama jarayo dakhliyadaada.

Magdhawga Ugu Yar

Wixii ah safarrada ka imanaya gudaha Minnesota, magdhowga ugu yar waxa lagu saleynayaa halkii daqiiqo, halkii mayl, iyadoo la raacayo qaabka soo socda:

1. $1.28 maylkiiba iyo $0.31 daqiiqadiiba inta uu darawalku wado qofka ("waqtiga lagu jira hawsha");
2. Haddii ay khusayso, $0.91 dheeri ah halkii maylba marka uu darawalku ku wado qofka baabuur ku jira shuruudaha Minn. Stat. Ann. §§ 299A.11 ilaa 299A.17, iyadoon loo eegayn in qalabka lagu ilaaliyo kursiga curyaanka la isticmaalay iyo in kale;
3. Boqolkiiba 80 wixii ah khidmadaha baajinta safarka ee uu bixiyo qofka la qaadayo, haddii codsiga safarka ay baajiso Lyft ama uu baajiyo qofka la qaadayo kadib markii darawalku uu dhaqaaqay inuu soo qaado qofka la qaadayo;
4. Magdhawga ugu yar oo ah $5.00 mar kasta uu darawalku qaado qof;
5. Haddii dakhliyada ku soo gala 14 maalmood gudahooda ay u dhigmaan wax ka yar qiimaha kor lagu sharaxay inta lagu gudajira muddadaas, waxaa lagu siin doonaa lacag dheeri ah oo u dhiganta faraqa u dhexeeya (x) dakhliyadaada ku soo galay muddada dakhliyada, iyo (y) qaddarka dakhliyada loo baahan yahay in la helo dhammaan wakhtiga lagu jira hawsha ee muddadaas.
6. Gunnooyinkaadeegga hadiyada ah qayb kama aha magdhowga ugu yar ee kor lagu soo sharaxay.
7. Magdhawga ugu yar ee kor ku taxan waxaa lagu sameyn karaa wa-kabeddel sanadle ah, laga bilaabo 1-da Janaayo, 2027, iyadoo la raacayo habraac la mid ah habraaca mushaharka ugu yar ee gobolka ee hoos yimaada Minn. Stat. Ann. §§ 177.24.

Khidmadaha Lyft

Rakaabku waxay ku siinayaan qaddar ay ku jiraan khidmadaha Lyft, oo ay kamid yihiin Khidmadda Adeegga iyo Khidmad Nidaamka (wadajir ahaan la yirahdo, "Khidmadaha Lyft"), sida hoos lagu sharraxayba. Lyft waxay ururin doontaa lacagaha aad ku leedahay baabuur-raacayaashu maadaama ay tahay wakiilkaaga lacaga ururinta ee xaddidan, waxaaba kuu soo diri doonaa lacagaha ay baabuur-raacayaashu bixiyaan marka laga jaro khidmadaha Lyft.

1. Khidmadda Adeegga: qaddarka loo gooyay baabuur-raacid kasta ee ku cad Kaarkaaga Qiimaha xiliyada baabuur-raacidda.

2. Khidmadda Nidaamka: waa qaddar doorsooma oo u dhigma lacagta uu bixinayo qofka la qaaday oo laga jaray: (i) Khidmadda Darawalka, (ii) wixii ah khidmad ama ah kharash dheeri ah ee adiga lagu siinayo, (iii) Khidmadda Adeegga, (iv) Khidmadaha qolooyinka kale ee ay Lyft ururiso , iyo (v) gunooyinka ama dhiirigelinada aad kasbatay iyadoo lagu salaynayo bixintaada Adeegyada Baabuur-wadaagga (Rideshare Services).

Noqnoqodka (inta jeer) iyo Helitaanka Dakhliga:

Si toos ah ayaa laguu siin doonaa lacagta usbuuc kasta iyadoo la adeegsanayo habka lacag-bixinta ee aad dooratay. Ma jiraan wax ah khidmado ama kharash oo la xidhiidha bixinta lacagta ee toddobaadlaha ah. Waxaad sidoo kale dooran kartaa in lagu siiyo lacagta marar ka badan toddobaadkiiba mar, balse waxaad bixineysaa khidmad (Eeg bogayaga Express Pay si aad u hesho macluumaad dheeri ah).

Warbixinta dakhliyada toddobaadlaha ah ayaad ka heli doontaa qaybta bixinta lacagta darawalka ee app-ka ee ku taalo halkan. Waxaad sidoo kale beddeli kartaa dookhyada bixinta lacagtaada adigoo galayo qaybta app-ka ee ku taalo halkan.

**2. Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Mushaharka leh**

Markaad u qalanto, waxaad xaq u leedahay inaad doorato dheefaha caymiska fasaxa qoyska iyo caafimaadka ee mushaharka leh, sida ku cad Cutubka 268B ee Xeerarka Minnesota.

**3. Kahortagga Takoorka**

Laguuma geysan doono takoor ku salaysan xubinimada koox la ilaaliyo, oo ay ku jiraan jinsiyada, asalka qaran, midabka, caqiidada, diinta, jinsiga, naafanimada, nooca galmo, heerka guurka, ama aqoonsiga jinsiga, waxaadna xaq u leedahay magdhow marka la eego sharciga haddii laguu geysto xadgudub kuwani ku salaysan.

**4. Xuquuqda iyo Magdhowyada**

Haddii aad aaminsan tahay in aadan helin dakhliyada ugu yar ee wakhtiga hawsha inta lagu gudajira wax kamid ah muddada dhakhli ee 14-ka maalmood ah, waxaad magdhow dheeri ah ka raadsan kartaa Lyft adiga oo qaybta Taageerada ee Lyft (Lyft Support) kala xidhiidhayo halkan. Codsi kasta oo noocan ah kadib, Lyft waa inay dib u eegis ku sameyso dakhliyadaada muddada 14-ka maalmood ah, haddii ay ogaato inaadan helin dakhliga ugu yar, waxay ku siin doontaa qaddar dheeri ah si loo xaqiijiyo inaad hesho dakhliga saacadlaha ah ee muddadaas.

Haddii aad la kulanto dhibaatooyin ama walaacyo kale, kooxda Taageerada ee Lyft ayaa diyaar u ah inay ku caawiyaan. Wakhti kasta ayaad qaybta taageerada ee Lyft kala xiriiri kartaa halkan.